



## Seattle Office of Labor Standards

### Seattle Office of Labor Standards (OLS, Xafiiska Heerarka Shaqada) – Balanqaadkeena ku aadan Bulshooyinka Muhaajiriinta iyo Qaxootiga

#### OLS ayaa Illaaliso Xaquuqda Qaxootiga iyo Soogalootiyaasha

Seattle Office of Labor Standards (OLS) Xafiiska xeerarka shaqada waxaa ka go'an inay u adeegto dhammaan shaqaalaha iyo ganacsiyada ku sugan Seattle, si loo hormariyo heerarka shaqada ee Caasimada Seattle. **Xatooyada mushaarka waamid saamayn wayn kuleh shaqaalaha soo galootiga iyo qaxootiga ah balse aan lawargelin dowlada.** OLS waxay bulshada siisaa adeegyo bilaash ah ayadoon la eegaynin waraaqaha sharciga. Adeegyada xafiiska (OLS) waxaa ka mid ah, baaritaanka xadgudubyada suurtagalka ah ee shaqada, iyo in xiriir lala sameeyo shaqaalaha iyo ganacsiyada si loo sameeyo wacyigelin iyo gudbinta meesh uu qofka ubaahanyahay.

#### **Warbixin muhiim ah ee ku wajahan bulshooyinka soogalootiga iyo qaxootiga ah ee Seattle:**

- ❖ OLS marnaba kuma waydiinayso xaalada sharcigaaga, oo uma baahnid in aad sharciga soo galootiga leedahay
- ❖ OLS waxay bixisaa adeega fasirada iyo turjumaanka luuqada oo bilaash ah.
- ❖ OLS waa **waax** ku taalo gudaha Caasimada Seattle, way ka gooniyeysantahay, oo lama wadaagto warbixin, dowlada faderaalka.

Seattle waa Caasimad Soo dhaweyn leh sababtoo ah waxaa aaminsannahay ka qaybqaadasho loo dhan yahay iyo sinnaan. Shaqaalaha caasimada ma weydiiyaan heerka muwaadinnimada waxayna u adeegaan dhammaan dadka dagan iyada oo aan loo eegin in ay sharci deganaan leeyihiin. Soogalootiyaasha iyo qaxootiga waa laga soo dhaweeyaa halkaan.

#### OLS ayaa Illaaliso Xaquuqda Shaqaalaha

Iyadoon aan loo eegayn Meesha aad ku noolow, hadii aad ka **shaqeysid** Seattle, **xaquuqda heerkaaga shaqada waxaa kamid ah:**

- Xaquuqda lagu helayo ugu yaraan mushaarka ugu yar ee magaalada Seattle;
- Xaqa aad u leedahay in lagu siiyo lacagta saacad walba oo aad shaqeysid;
- Xaquuqda lagu bixinayo lacagta saacada jirada haddii adiga ama qoyskaaga iranyahay iyo aadan aadi karin shaqada;
- Xaquuqda loogu soo wargelinayo OLS haddii aad aaminsantahay in badroonigaaga ku xadgudbay xaquuqdaada; iyo
- Xaquuqda loogu haynayo magacaaga iyo warbixinta si gaar ah haddii aad ku soo wargelisay OLS ama ka qeybqaadatay baaritaan walba.

---

810 Third Avenue, Suite 375, Seattle, WA 98104-1627

Tal: (206) 256-5297, Fakiska: (206) 684-3422, TYY (206) 684-4503, websaydka <http://www.seattle.gov/laborstandards>  
Badrooniga fursad simman. Hoy'ada ee dadka naafada leh iyo adeegyada fasiraada luuqada waa la bixiya markii la codsado.

## **OLS ayaa illaalisa in Shaqaalaha laga Aargoosto**

Sharciyada Seattle waxay illaaliyaan shaqaalaha soo wargeliyaa xadgudubka heerarka shaqada ee ka aargoosiga. **Waa sharci daro in badrooniga uu kaga aargoosto shaqaalaha qaababka soo socda:**

- Ogeysiinta ama u hanjabaada inuu u sheegayo maamulada socdaalka in shaqaale ama xubin qoyskiisa kamid ah uusan sharci laheyn;
- U gudbinta wargelin been ah hay'ada dowlada; iyo
- Ka joojinta ama darajo dhimista shaqaalaha.

Iyada oo OLS aysan damaanad qaadi karin in shaqaalaha uusan la kulmeynin aargoosi oo nala soo xiriirkeena cabashada heerarka shaqada, ma fullino ciqaabaha shaqaalaha ka aargoosto shaqaalaha. **Haddii aad dareentid inaad la kulantay aargoosiga ama xadgudubka heerarka shaqada, ama haddii aad ka qabtid su'aalaha ku saabsan xaquuqdaada, kala xiriir OLS: 206-256-5297, [workers.laborstandard@seattle.gov](mailto:workers.laborstandard@seattle.gov), ama <http://www.seattle.gov/laborstandards/contact#workers>.**

**Haddii aad su'aal ka qabtid wixii ku saabsan heerarka u hogaansanaanta shaqada, kala xiriir OLS: 206-256-5297 ama [business.laborstandards@seattle.gov](mailto:business.laborstandards@seattle.gov).**

**OLS sidoo kale waxay heshiis la gashaa [bulshada](#) iyo [hay'adaha](#) ganacsiga si ay u siiyaan wacyigelin iyo ku caawinta heerarka shaqada. Haddii aadan raaxo ku dareenin si toos ah ula xiriirida OLS, waxaad la xiriiri kartaa mid ka mid ah jaalalkeena wixii siu'aala ah ee ku saabsan xaquuqahaaga iyow aajibaadyada.**

### **Illaha Dheeraadka ah**

*Wixii shaqaalaha iyo ganacsiga oo diyaarinayo tallaabada fullinta socdaalka ee goobta shaqada:*

- [What to Do If Immigration Comes to your Workplace \(Maxaan sameeya Haddii Socdaalka Imaadaan goobtaada shaqada\)](#) (waxaa lagu heli karaa afafka Ingiriis, Isbaanish, Taay, Koriyaan, iyo Shiinees), waxaa soo saaray National Immigration Law Center iyo National Employment Law Project (Mashruuca Sharciga Shaqada Qaranka); iyo
- [Jaheynta La xiriirto Fullinta Socdaalka](#), waxaa soo saaray Qareenka Guud ee Washington.

*Oo helayaasha DACA*

- Caasimada Seattle Office of Immigrant and Refugee Affairs (Xafiiska Arimaha Muhaajiriinta iyo Qaxootiga) [bogga webka DACA](#), oo ay ku jiraan warbixinta aasaaska iyo DACA (Deferred Action for Childhood Arrivals, Tallaabada Dib u dhigida ee Imaanshaha Carruurnimada, fasiraada) bilaash ah caawinta dhacdooyinka ee jaalalka bulshada Caasimada ay ku diyaarinayaan gudaha iyo agagaarka Seattle.
- Northwest Immigrant Rights Project (Mashruuca Xaquuqda Muhaajiriinta Wuqooyi galbeed) [bogga illaha DACA](#); iyo
- Hay'ada qaranka Here to Stay [bogga qadka caawinta buuxdo leh](#), oo ay ku jiraan tallada daryeelka caafimaadka maskaxda.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan heerarka shaqada Seattle iyo xaquuqahaaga, fadlan kala xiriir OLS [workers.laborstandards@seattle.gov](mailto:workers.laborstandards@seattle.gov), ama soo wac 206-256-5297.